


**Liiska Warbixinta Rakibidda 1aad: Kursiga Gaariga ee Ilamaha ee Gadaal Kaliya U Jeeda**

**Muhiim:** Kan waa liis warbixineedka guud ee loo samayay in lala kaashado diiwaanka gaariga iyo diiwaanka warbixinta kursiga gaariga ee cunugaaga. Si aad udadajisid waxtarka liis warbixineedka kaasho oo hadba isha mari diiwaanadaas.

**____1) Xaqiijiso in kursiga gaariga uu yahay mid sax u ah joogga iyo culayska cunuggaaga.**
• Culeyska: xadka culayska kore waa 20-40 rodol, taasoo ku xiran kursiga; iska eeg calaamadaha ku qoran kursiga gaariga oo xadaynaya heerka culayska.
• Joogga: isticmaal midka cunuga madaxiisa uu 1 inji uu kor u dhaafaya daharka adag; kaddibna kursiga badalmaya bedal. Iska eeg calaamadaha ku qoran kursiga gaariga oo xadaynaya heerka joogga.
• Waxaa habboon in la isticmaalo kursiga gaariga ee leh 5 xakame.

**____2) Kursiga gaariga waxaa dhigta kursiga dambe ee gaariga.**
• Hadii gaariga uu yahay "SUV" ama "van" oo leh saddex saf, kursiga gaariga ku rakib safka dhexe.
• Kursiga gaariga ku rakib meesha dhexe ee kursiga gaariga, haddii ay taasi suurtagal tahay (faahfaahin dheeraad ah ka eeg diiwaanka gaariga). Xasuuso: Waxay u badantahay in aysan kuu suurtoobin in si adag kursiga dhexe lagu xiro. Haddii ay sidaas tahay, iskuday in aad kursiga gaariga dhigto fadhiga dambe ee bixdixda ama midigta ee daaqadda u dhow. Sida ugu ammaan badan ee ilmahaaga waa adigoo raacaya habka ah in uu kursiga si adag gaariga loogu xiro.
• Kursiga gaariga u jeedi dhinaca dambe ee gaariga.

**____3) Waxaad doorataa hal nooc ee kursiga gaariga lagu rakibayo.**
• Suunka dhabta kaliya (badanaaba ku taala halka dhexe ee kursiga dambe)
• Suunka dhabta iyo garabka.
• Nooca LATCH ("Dhaabashada iyo Silsiladaynta Hoose ee Caruurta", oo uu horayba gaariga u lahaa **- hoos eeg**)

**Xusuusnow:** Xajinta kore looma baahna in la isticmaalo kursiga caruurta ee gadaal u jeeda. Silsiladaha hoose isticmaal oo kaliya marka aad kula xiraysid nooca LATCH.

**____4) Ku rakib kursiga gaariga.**
**Muhiim:** Iska eeg calaamadaha kursiga gaariga ku qoran iyo diiwaanka tilmaamaha kursiga gaariga si aad uga heshid akhbaarta ah sidii kursiga gaariga loogu rakiba lahaa ayadoo la isticmaalayo lab mid, suuunka dhabta, suunka dhabta iyo garabka, ama nooca LATCH. Waxaa kaloo tilmaamoyin ka eegtaa diiwaanka gaariga, oo ay kamid tahay haddii aad loo baahanyahay in la isticmaalo biinka wax isku xira.


Sawirkan wuxuu na tusayaa kursiga gaadal u jeeda oo
lagu rakibay suunka dhabta kaliya.



• Kursiga gaariga ka dhig mid xoogaa dhinac ujanjeera marka ilamaha ay saaranyihiin. (xagal 30-45 digirii marka loo eego xagalka toosan – sawirka eeg).

**____5) Suunka gaariga ku adkee ama silsiladaha lagu xirayo hoos u dhig (LATCH).**
• Kursiga gaariga waa inuusan gees ka gees ama horay iyo gadaal ka dhaqaaqin wax ka badan hal inji halka uu ku rakibnaa. Qofkale ha si fiican hoos ha ugu riixo kursiga gaariga cunuga inta aad adiga suunka aad kula xiraysid, ama adiga ku kadaloobso kursiga gaariga inta aad suunka gaariga si fiican ugu xiraysid.

**____6) Ilamaha kursiga gaariga suunka kula xir (sawirka eeg).**



• Isticmaal xakamaha jeexdinta hoose ee kursiga gaariga ee ilmaha dhashay. Suunka xakamaya waa inuu ku yaalla garbaha cunugga ama ay uu ka hooseeyo.
• Hubso in suunka xakameynta nafaas yahay oo u ballac ugu xiran yahay garbaha cunugga.
• Hubso in biinanka balastikada ee suunka celinaya ay ku aaddanyihiin kilkilaha ilmaha.
• Haddii kubeerto la isticmaalayo markasta marka hore ilmaha suunka kursiga kula xir, kaddibna kubeertada korsaar suunka ama xakameeyaha.
• Eeg in siddooda ay taasho meesha loogu talagalay. Kuraasiga ilmaha badankooda, siddooda waa in habka hoose loo dhigo inta uu gaariga safarka ku jiro. Laakiin waxaa jirta in kuraasida qaarkood siddooda waxaa loo dhaafi karaa boosas kala duwan. Eeg diiwaanka tilmaam bixinta gaariga si aad ku oogatid booska saxda ee kursigaaga.

Laga Soo Xigtay: Maamulka Ammaanka Gaadiidka Waddoyinka Qaranka, Waaxda Gaadiidka Maraykanka (National Highway Traffic Safety Administration, U.S. Department of Transportation)

**Sida wax loo sameeyo fiidiyaha ka fiirso**: "Your Baby – Newborn to Age 2 in Rear-facing Seats" (*Canuggaada – Ilmaha dhashay illaa 2 jirka ku xir Kursaasta Dambe*) Lagala xariirayo http://www.chop.edu/carseat

**LATCH (Dhaabashada iyo Silsiladaynta Hoose ee Caruurta): Gadaal u Jeeda**

**LATCH** (Dhaabashada iyo Silsiladaynta Hoose ee Caruurta ) waa hab kursiga gaariga lagu rakibayo ayadoon aan la isticmaalin suunka gaariga. Waxaa kamid ah laba joog ee biraha yaryar, oo loo yaqaano biinanka hoose, waxayna ku yallaan gaadasha kursiga dambe halka isugu imaanayaan qaybaha kursiga ay isugu imaanayaan. Kuraasida gaariga ee leh LATCH waxay leeyihiin meelo biinaanka lagu dhejiyo oo lagu xakameeyo. Gawaarida oo idil ee la soo saaray wixii ka dambeeyay Sateembar 1, 2002 ayaa laga rabaa inay LATCH lahaadaan iyo kurasida gawaarida caruurta. Haddii aadan hubinin in gaarigaaga ama kursiga gaariga uu wato qalabkaan, eeg diiwaanka gaariga iyo tilamaan bixiyeyaasha kursiga gaariga. Haddii aysan labadaan lahayn biinanka, waxaad u baahnaan doonta inaad isticmaashid suunka gaariga si aad kursiga gaariga ugu xakamaysid.
**Muhiim:** LATCH kaliya u isticmaal sida nooca fadhiga ay ku soo talisay warshadda gaariga samaysay. Haddii la isticmaalayo suunka caynka hoose, suunka fadhiga gaariga ha isticmaalin.

**Biinanka suunka lagu adkeeyo**
Biinanka suunka lagu adkeeyo aya la rabaa in lagu xiro gawaarida cusub, minivan iyo baabuurta fudud laga soo bilaabo bishii Sateembar ee 2000.
**Muhiim:** Xakameyeyaasha ugu fiican looma isticmaalayo gawaarida ilmaha ee gadaal loo jeedinayo.

**Ku Rakibidda Saxda ah**
• LATCHka kursiga gaariga waa in la mariyo meesha furan oo ay ku qorantahay calaamadda gadaal u jeedinta. Suunku waa in uu si ballac loo xiraa ee aan la wareejin.
• Kursiga gaariga u dhig hab dhacdiid oo kale ah adiga oo ku xiraya xargaha LATCH.
• Si ay sahlanaato loogu rakibo, suunka LATCHka sida ugu dherer badan u fidi.
• Kula xir kuxirayaasha hoose ee gaariga. (Faahfaahinta dheeraad ka eeg diiwaanka gaariga). Iska hubso in kursiga uu si fiican loogu xiray.
• Si adag hoos ugu riix ama inta gaariga meesha dhexe ku jilba jabsatid si aad hoos ugu riixdid kursiga gaariga inta aad ku adkanaysid suunka LATCH. (Kursiga waa inuusan ka durqin wax hal inji badan gees ka gees ama horay iyo gadaal halka ku addan meesha suunka uu marayo.) Haddii suunka uusan si adag ugu xirnaani, fadhi kale ku day ama inta furfurtid habka LATCH oo isticmaal habka suunka kursiga.

Laga Soo Xigtay: Maamulka Ammaanka Gaadiidka Waddoyinka Qaranka, Waaxda Gaadiidka Maraykanka, Machadka Dhakhaatiirta Caruurta ee Ameerika (National Highway Traffic Safety Administration, U.S. Department of Transportation; American Academy of Pediatrics)